# Faallo Kooban 25

Oktoobar 2023

## Qiimeyn dhismaha iyo waxqabadka goleyaasha deegaanka ee Galmudug & HirShabeelle

### Soo koobid

Inkastoo dhismaha dowlad-goboleedyada lasoo gabagabeeyey sanadkii 2016 (marka laga reebo Puntland), waxaa yareyd tixgelintii la siiyay iyo horumarkii laga gaaray dhismaha goleyaasha deegaanka. Goleyaasha deegaanka ee tirada yar ee ilaa hadda la dhisay, ayaa sida ku cad natiijooyin hordhac ah ee kasoo baxday daraasaddan socota wajahaya caqabado waaweyn oo ka hortaagan gudashada waajibaadkooda aasaasiga ah. Waxaa kale oo jira caqabado waaweyn oo ku wajahan dhismaha goleyaasha deegaanka ee degmooyinka qaar. Faalladan kooban waxa ay soo bandhigeysaa natiijooyin hordhac ah oo kasoo baxday cilmibaaris socota oo baareysa dhismaha goleyaasha deegaanka, sida ay u shaqeeyaan, iyo sidii loo hormarin karo ee dowlad-goboleedyada Galmudug, Hirshabeelle iyo Koonfur Galbeed. Natiijooyinka lagu gorfeeyay faalladan ayaa keliya ku saleysan Galmudug iyo Hirshabeelle, maadaama aan weli lasoo gabagabeyn xog uruurinta Koonfur Galbeed. Faalladan ayaa diiradda saareysa xaaladda hadda ee goleyaasha deegaanka ee Galmudug iyo Hirshabeelle; caqabadaha hortaagan hannaanka dhismaha goleyaasha deegaanka; caqabadaha hortaagan dhismaha goleyaasha deegaanka ee magaalooyinka waaweyn; iyo caqabadaha waaweyn ee haysta waxqabadka goleyaasha deegaanka ee la dhisay ee labada dowlad-goboleed. Ugu dambeyntii, faallada ayaa talooyin soo jeedineysa. Waxaa kamid ah talooyinka baahida loo qabo in dowladaha hoose ay muujiyaan daacadnimo iyo waxqabad, taasoo fure u ah bixinta canshuurta ee ganacsatada; si ay u dhismaan goleyaal deegaan oo sharci ah sidoo kalena shaqeeya, waa in dowlad-goboleedyadu siiyaan wakhti ku filan iyo agabka la heli karo sidoo kalena u oggolaadaan ka qeybgalka hannaanka bulshooyinka ay khusayso, iyo in ay si dhab ah u wada hadlaan oo ay tanaasul isku sameeyaan.

### Ku saabsan Somali Public Agenda

Somali Public Agenda (SPA) waa hay'ad aan macaash doon ahayn oo ka shaqeysa cilmibaarista arrimaha jaangoynta iyo maareynta siyaasadaha dalka xarunteeduna tahay magaalada Muqdisho. Ujeedka hay'adda waa hagaajinta maamulka dowliga ah iyo horumarinta adeegyada dowladda ee Soomaaliya iyadoo loo marayo cimibaaris iyo falanqeyn aqoon ku dhisan.

**www.somalipublicagenda.org**

**© 2023 Somali Public Agenda**

### Hordhac

Inkastoo Soomaaliya ay nidaam federaal qaadatay sanadkii 2004, haddana dadaallada lagu dhisayo maamullada xubnaha ka ah dowladda federaalka ayaa billowday kadib markii dastuurka federaalka si kumeelgaar ah loo ansixiyay Agoosto 2012. Waxaa la dhisay afar dowlad-goboleed (Jubaland 2013, Koonfur Galbeed 2014, Galmudug 2015, iyo Hirshabeelle 2016). Qodobka 48[1(b)] ee dastuurka federaalka kumeelgaarka ah ayaa dowladaha hoose hoos geynaya heerka labaad ee qaab-dhismeedka federaalka; waxaa uu si cad u sheegayaa in Dowlad-goboleedyada ay dhisaan dowladaha hoose. Haddana, dhismaha dowladaha hoose ee dowlad-goboleedyada, marka laga reebo Puntland, waa mid gaabis ah oo aan u muuqan mid mudnaan leh, maadaama dowlad-goboleedyadu ay la tacaalayaan arrimo kale oo adag oo ka dhashay duruufahii lagu dhisay.

Waxaa intaa dheer, caqabado badan ayaa sababayay horumarka yar ee laga gaaray dhismaha goleyaasha deegaanka ee dowladaha hoose. Waxaa kamid ah jiritaan la'aanta kaabayaal sharci, maalgelin la'aan, jawiga siyaasadeed oo aan degganayn, amni-darro, awood farsamo oo aan jirin, iyo tijaabada oo ku cusub dowlad-goboleedyada. Marka lagasoo tago in dowlad-goboleedyada maareynayaan arrimaha qaar, haddana horumarka dowlad-goboleedyada Hirshabeelle iyo Jubaland ee dhismaha goleyaasha deegaanka ayaa ah kuwo  gaabis ah marka loo barbar dhigo dowlad-goboleedyada Galmudug iyo Koonfur Galbeed.

Faalladan kooban waxa ay soo bandhigeysaa natiijooyin hordhac ah ee daraasad socota oo laga sameynayo geeddi-socodka dhismaha goleyaasha deegaanka, caqabadaha jira, wax-qabadka, iyo sida lagu hormarinkaro ee dowlad-goboleedyada Galmudug, Hirshabeelle, iyo Koonfur-galbeed. Natiijooyinka hordhaca ah waxay khuseeyaan oo keliya Hirshabeelle iyo Galmudug oo ay Somali Public Agenda wajigii xog uruurinta soo gabagabeysay bilihii Luulyo iyo Ogoosto ee sanadkan. Faalladan ayaa si dhaw u eegaysa xaaladda dhismaha goleyaasha deegaanka ee Galmudug iyo Hirshabeelle; caqabadaha hortaagan hanaanka dhismaha goleyaasha deegaanka; caqabadaha hortaagan dhismaha goleyaasha deegaanka ee magaalooyinka waaweyn ee Hirshabeelle iyo degmooyinka qaar ee Galmudug; caqabadaha waaweyn ee hortaagan waxqabadka goleyaasha deegaanka dhisan ee Galmudug iyo Hirshabeelle. Faallada waxa ay kusoo gunaanadeysaa tallooyin tixgelin mudan.

### Dhismaha goleyaasha deegaanka ee Galmudug & Hirshabeelle

#### *Galmudug*

Dowlad-goboleedka Galmudug oo ah maamulka ay ku midoobeen gobollada Galguduud iyo koonfurta Mudug, ayaa la dhisay bishii Luulyo ee 2015. Waxa uu ka kooban yahay 10 degmo oo ah degmooyinkii ka horreeyay 1991; 7 kamid ah waxay ku yaalaan gobolka Galguduud halka 3-da kalena ay ku yaalaan gobolka Mudug. Dowlad-goboleedka ayaa sidoo kale ansixiyay sagaal degmo oo cusub sanadihii 2022 iyo 2023: shan degmko oo gobolka Galgaduud ah, iyo afar koonfurta gobolka Mudug ah. Wadarta degmooyinka Galmudug kahor iyo kadib 1991 waa 19 degmo (12 ku yaalla gobolka Galgaduud iyo 7 gobolka Mudug ku yaalla).

Muddo-xileedkii ugu horeeyay ee maamulka Galmudug (Luulyo 2015- Luulyo 2019) geedi-socodka dhismaha golaha deegaanka waxa uu ahaa mid fadhiid ah, wax mudnaan ahna lama siin, maadaama maamulkii xilligaasi uu khilaaf kala dhexeeyay urur diimeedkii hubeysnaa ee Ahlu Sunna Waljamaaca (ASWJ), oo gacanta ku hayay goobo muhiim ah oo ka tirsan gobolka oo ay kamid ahayd Dhuusamareeb,

oo ah xarunta maamulka. Maamulka Galmudug ayaa waxaa u suuragashay in uu sanadkii 2017 billaabo geeddi-socodka dhismaha goleyaasha deegaanka ee degmooyinka, waxa uuna meel mariyay sharciga dowladda hoose.

Geedi-socodka ayaa dib loo billaabay bartamihii sanadkii 2020 kadib markii la doortay madaxweynaha xilka haya, Axmed Cabdi Kaariye "Qoorqoor" horraantii sanadkaas. Taariikhda la daabacay faalladan, Dowlad-goboleedka Galmudug ayaa ku guuleysatay in uu dhiso 7 gole deegaan; shan kamid ah waa degmooyinkii jiray kahor 1991 (Galkacyo, Cadaado, Dhuusamareeb, Cabudwaaq, iyo Balanbale) waxaa kale oo jira labo degmo oo dhawaan la sameeyay oo degmo laga dhigay 2021-kii (Guriceel & Xeraale). 7-daas degmo, Dhuusamareeb iyo Gaalkacyo ayaa ku jira 'heerka A' halka shanta degmo ee soo hartay ay ku jiraan 'heerka B'.

Geedi-socodka dhismaha goleyaasha deegaanka  ayaa ku bilowday sameynta guddi farsamo oo ka kooban 9 xubnood oo ay ku jiraan 4 wakiil oo ka socda Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Dib-u-heshiisiinta iyo Dowladaha Hoose ee Galmudug, iyo 5 xubnood oo ka socda baarlamaanka dowlad goboleedka. Hawshan ayaa laga bilaabay degmada Cadaado, bishii Luulyo 2020-kii. Waxaa la filayey inay si fudud kusoo dhamaato maadaama ay degmadu lahayd gole deegaan tan iyo sanadkii 2011. Hase yeeshee, shaqadii ayaa istaagtay kadib markii Saleebaan oo ah jufo ka tirsan Habargedir ay ku murmeen awood qeybsiga. Tani waxay keentay in Wasaaradda Arrimaha Gudaha ee Dowlad-goboleedka ay hawsha ka bilowdo Gaalkacyo (koonfurta) dabayaaqada Luulyo 2020.

Howsha ayaa kusoo dhamaatay xulista xubnaha golaha deegaanka ee Galkacyo iyo doorashadii xigtay ee duqa magaalada iyo ku xigeenkiisa bishii Oktoobar 2020. Maadaama ay ahayd 'heerka A', Galkacyo waxay ahayd inay yeelato 27 xubnood oo golaha deegaanka ah. Sikastaba ha ahaatee, tirada ayaa laga dhigay 29 xubnood si loo qanciyo metelaadda kooxda laga tirada badan yahay ee Gaalkacayo degan iyo beesha Saruur ee Habargedir, oo deegaanno ku leh Koonfurta Mudug oo ay Gaalkacyo u tahay magaalo madax.

Waxaa hakad galay hanaanka geeddi-socodkii dhismaha goleyaasha deegaanka ee Galmudug kadib markii madaxda dowlad-goboleedka ku mashquuleen doorashooyinka federaalka. Sikastaba ha ahaatee, howsha ayaa dib loo bilaabay kadib markii lasoo gabagabeeyay doorashadii federaalka bishii May 2022. Dhismaha goleyaasha degmooyinka ayaa mar kale u noqday mudnaan hoggaanka maamulka. Wasaaradda Arrimaha Gudaha Galmudug ayaa lix bilood gudahood ku dhistay 5 gole deegaan ee degmooyinka Cadaado, Guriceel, Balanbale, Cabudwaaq, iyo Dhuusamareeb – intii u dhexeysay Luulyo iyo Disembar 2022. Halka, bishii Luuliyo ee 2023-kii, wasaaradu ay kusoo gabogabeysay dhisida golaha deegaanka ee degmada Xeraale.

Hal arrin oo ay ka sinnaayeen goleyaasha deegaanka ee dhawaan la sameeyay ayaa ah in dhammaan degmooyinka ku jira 'heerka B' ay leeyihiin 23 kursi; taasoo labo kursi ka badan 21-ka kursi ee ku xusan Xeerka Dowladaha Hoose. Sidoo kale, labada degmo ee ku jira 'heerka A' – Dhuusamareeb iyo Galkacyo (Koonfurta) – waxay leeyihiin goleyaal deegaan oo ka badan tirada kuraasta sharci ahaan la oggol yahay: 33 xubnood ayuu ka kooban yahay golaha deegaanka Dhuusamareeb halka uu 29 xubnood yahay golaha deegaanka Gaalkacyo. Sikastaba ha ahaatee, masuuliyiin ka tirsan Wasaaradda Arrimaha Gudaha Galmudug ayaa tirada dheeriga ah ku macneeyay in ay ka dhalatay isku dheellitirka metelaadda beelaha. Wasaaradda Arrimaha Gudaha oo hawshan hoggaaminaysay ayaa arrintaas uga jawaabtay in ay taageereen golayaal deegaan oo baaxad leh oo loo dhan yahay. Mas'uuliyiintan ayaa sheegay in 23-ka kursi ee golaha deegaanka Cadaado ay jireen kahor inta aan la bilaabin hannaanka dhismaha goleyaasha deegaanka ee Galmudug, islamarkaana ay ku dhisan yihiin heshiis dhex maray bulshada halkaasi ku dhaqan. Dowlad Goboleedka Galmudug ayaa xushmeysay awood qeybsiga kuraasta golaha deegaanka ee horey u jiray.

### *Hirshabeelle*

Hirshabeelle ayaa ah Dowlad-goboleedii ugu dambeeyay waxaana la dhisay dabayaaqadii sanadkii 2016, iyadoo la isku daray gobollada Hiiraan iyo Shabeellaha Dhexe. Hirshabeelle ayaa ka dhashay hannaan muran badan iyadoo ay soo dhaweyd doorashadii baarlamaanka federaalka. Hannaanka wuxuu wiiqay heshiiska siyaasadeed ee maamulka oo kala qeybsan tan iyo markii la dhisay. Sidoo kale, dhismaha dowlad-goboleedka ma aysan abuurin jawi ku habboon dhismaha goleyaasha deegaanka.

Dowlad-goboleedka Hirshabeelle ayaa ka kooban 12 degmo (7 gobolka Shabeellada Dhexe ah iyo 5 gobolka Hiiraan ah). Sikastaba ha ahaatee, waxa uu maamulka ansixiyey Diseembar 2022-kii labo degmo oo cusub oo kala ah Gamboole oo ka tirsan gobolka Shabeellaha Dhexe iyo Farlibaax ee gobolka Hiiraan. Wadarta degmooyinka Hirshabeelle ee jiray kahor 1991-kii iyo kuwa dhawaan ka sameeyay ayaa ah 14 degmo (8 degmo oo ka tirsan gobolka Shabeellada Dhexe iyo 6 ka tirsan gobolka Hiiraan).

Geedi-socodka dhismaha goleyaasha deegaanka ee Hirshabeelle waxa uu bilowday sanadkii 2018. Wasaaradda Arrimaha Gudaha Hirshabeelle ayaa howshan ka bilowday degmooyinka Warsheekh iyo Jowhar ee gobolka Shabeellaha Dhexe, iyo degmooyinka Buulo-barde iyo Beledweyne ee gobolka Hiiraan. Sikastaba ha ahaatee, degmada Warsheekh ayaa ahayd degmada keliya ee laga dhisay gole deegaan ilaa dabayaaqadii bishii Oktoobar ee sanadkan 2023-ka, oo dib loo bilaabay dhismaha golaha deegaanka degmada Jowhar. Howsha dhismaha golaha deegaanka ee degmada Warsheekh ayaa soo bilaabatay sanadkii 2018, waxaana lasoo gaba-gabeeyay sanadkii 2019. Muddo-xileedkii golaha deegaanka degmada Warsheekh ayaa dhamaaday, waxaana la filayaa in la dhiso gole cusub iyadoo la raacayo qaabkii hore, sida ay sheegtay Wasaaradda Arrimaha Gudaha ee maamulka Hirshabeelle.

Taa beddelkeeda, dhismihii goleyaasha deegaanka ee degmooyinka kale ee hawsha laga bilaabay ayuu hakad ku yimid. Tani waxay ka dhigaysaa maamul-goboleedka labaad ee leh hal gole deegaan oo keliya (inkastoo uu muddo-xileedkiisu dhamaaday) marka laga reebo Jubaland (Afmadow ayaa ah degmada keliya ee Jubaland ka tirsan ee leh gole deegaan oo la dhisay Oktoobar 2020).

## Caqabadaha haysta geeddi-socodka dhismaha goleyaasha deegaanka ee Galmudug & Hirshabeelle

Geedi-socodka dhismaha goleyaahsa deegaanka ee Galmudug iyo Hirshabeelle waxa uu la kulmay dhowr caqabadood. Waxa aan halkan ku sheegeynaa shan caqabadood oo asaasi ah oo lagu ogaaday daraasaddan weli socota:

**Wacyiga iyo fahamka bulshada oo kooban:** Fahamka xaddidan ee dadweynaha marka la eego doorka iyo shaqooyinka goleyaasha deegaanka ayaa ahayd caqabad weyn oo ay sheegeen ku dhawaad dhammaan dadkii aan wareysanaynnay ee ku sugnaa labada maamul ee Galmudug iyo Hirshabeelle. La-wareyste xog-ogaal ah oo ku sugnaa Jowhar ayaa dhibaatadan ku sababeeyay in dadku ay la qabsadeen maamullada aan rasmiga ahayn, arrintan ayaa keentay in walaac laga muujiyo waxa ka dhalan kara hannaanka cusub. Fahamka xaddidan ee goleyaasha deegaanka waxay muujisay aragtida ka dhex jirta bulshada ee ah in xubinnimada goleyaasha deegaanka lagu helayo mushaar fiican. Taasi waxay abuurtay loollan adag oo loo galay kuraasta golaha deegaanka oo ay ku tartameen musharixiin ka kala socda jufooyinka.

**Hardanka awood qeybsiga:** Dad aad u badan oo la-wareysteyaal xog-ogaal ah iyo ka qeybgalayaasha dood-kooxeedyo ayaa tilmaamay in awood qeybsiga kuraasta golaha deegaanka ay ahayd caqabad weyn oo soo foodsaartay geeddi-socodkii dhismaha golaha deegaanka ee Galmudug iyo Hirshabeelle. Sida ay sheegeen ka qeybgalayaasha daraasaddan, doodaha, khilaafaadka, iyo go'aannada awood qeybsiga golaha deegaanka ee beelaha ayaa waqti badan ku baxay. Sababtuna waxay tahay in jufo kastaa ay rabto in ay hesho metelaad

ka badan jufooyinka kale ee ay la wadaagto golaha deegaanka. Beelaha ayaa rumeysan in tirada xubnaha golaha deegaanka ee beel walba ay ka turjumeyso degenaashaheeda iyo maqaamka ay ku leeyihiin degmada iyo tuulooyinka hoos yimaada.

**Hannaanka oo lagu degdegay:** Ka-qeybgalayaasha daraasadda ee dowlad-goboleedka Galmudug ayaa xusay in Wasaaradda Arrimaha Gudaha ee Dowlad-goboleedka ay dedejisay hannaanka waqti ku filanna aysan u qoondeyn marxaladaha muhiimka ah ee dhismaha goleyaasha deegaanka. Qaar kamid ah ka qeyb galayaasha daraasadda ee Galmudug ayaa sheegay in Wasaaradda Arrimaha Gudaha ay si toos ah ugu gudubtay heerkii awood-qeybsiga ee dhismaha goleyaasha deegaanka, islamarkaana ay si deg deg ah usoo gebagebeysay hannaanka, iyadoo la sheegay in dano siyaasadeed laga lahaa iyo in loo billaabo mashruuca deeq bixiyayaasha ee loogu talagalay dowladaha hoose eel eh gole deegaan.

**Wax is-daba-marin siyaasadeed:** Sida ay muujineyso natiijada xogta aan soo uruurinay, hoggaanka sare ee Galmudug ayaa saameyn ku lahaa hannaanka dhismaha goleyaasha deegaanka ee degmooyinka waaweyn si ay u xaqiijiyaan doorashada xubin gole oo saaxiib la ah oo ay iyagu sii doorteen in ay noqdaan duqa magaalada iyo kuxigeenkiisa. Sikastaba ha ahaatee, dhismaha golaha deegaanka ee Galkacyo ayaa iska caabiyay saameyntan waxa ayna soo saareen natiijo ka duwan ajendaha madaxda dowlad-goboleedka. Intaa waxaa dheer, xogtu waxay muujisay in saameynta hoggaanka dowlad-goboleedka ay ahayd mid aad u yar marka loo eego degmooyinka hareeraha ku yaalla oo loo arkayay inaysan lahayn awood dakhli sidoo kalena aysan uga iman karin khatar siyaasadeed iyo mid amni dowla-goboleedka. Sikastaba ha ahaatee, wax-is-daba-marinta hannaanka ayaa bulshada ka weeciyay lahaanshaha goleyaasha degmada, sidaas awgeedna waxaa loo arkaa in ay yihiin xubno ay magacowdeen maamulka dowlad-goboleedka.

Musuqmaasuqa xilliga dhismaha golaha deegaanka: Ka qeybgalayaasha daraasadda ayaa sheegay in codad iibsi ay sameeyeen musharixiinta u tartamayay kuraasta golaha deegaanka iyo jagooyinka duqa magaalada iyo ku xigeennada ee geeddi-socodkii dhismaha goleyaasha deegaanka ee Galmudug. Intaa waxaa dheer, hoggaanka dowlad-goboleedka ayaa ballanqaaday inuu jagooyin heer dowlad-goboleed ah siin doono jufooyinka qaar iyagoo ku beddelenaya u doorashada golaha deegaanka ee shaqsiyaad uu wato maamulka ama ka joojiyaan musharax gaar ah oo u taagan jagada duqa magaalada oo la tartamaya musharaxa uu wato hoggaanka maamulka. Sikastaba ha ahaatee, geeddi-socodka dhismaha golaha deegaanka ee Xeraale waxaa lagu sifeeyay inuu ahaa hannaan xor iyo cadaalad ah oo aan ku lug lahayn cod iibsi iyo musuqmaasuq.

## Caqabadaha hortaagan dhismaha goleyaasha deegaanka magaalooyinka waaweyn ee Hirshabeelle & Galmudug

Sida aan kor kusoo xusnay, Hirshabeelle ayaa ilaa hadda hal gole deegaan u sameysay degmada Warsheekh ee gobolka Shabeellaha Dhexe. Sikastaba ha ahaatee, dhismaha golaha deegaanka Jowhar ayaa dib loo bilaabay dabayaaqadii Oktoobar ee sanadkan 2023 iyadoo xiliga aan qoraalkan daabaceyno uu dhismaha golaha deegaanka Jowhar socdo. Inta badan degmooyinka Hirshabeelle ayaa ahaa kuwo xor ka ah al-Shabaab, inkastoo kooxdan ay ku sugnaayeen tuulooyin ku xeeran degmooyinkaas kahor inta aysan howlgallada ay ciidamada sameeyeen uga saarin qaar kamid ah deegaannadaas. Sikastaba ha ahaatee, daraasaddu waxay ogaatay inay jiraan caqabado wiiqay hirgelinta hannaanka dhismaha goleyaasha deegaanka ee magaalooyinka waaweyn. Caqabadahan ayaa ah kuwo ku badan Hirshabeelle marka loo eego Galmudug. Dhanka Hirshabeelle, arrimahan soo socda ayaa la sheegay inay ka dhigan yihiin caqabado waaweyn oo hortaagan dhismaha goleyaasha deegaanka:

**Rabitaan la'aan siyaasadeed:** Inta badan xog-ogaallada aan wareysanay iyo kasoo qeybgaleyaasha doodo kooxeedyada ee Dowlad-Goboleedka Hirshabeelle ayaa tilmaamay in rabitaan la'aanta siyaasadeed ee hoggaanka dowlad goboleedka iyo maamullada heer gobol, iyo heer degmo ay caqabad weyn ku noqotay in goleyaal deegaan laga dhiso magaalooyinka waaweyn. Waxay tani ku macneeyeen in ay cabsi madaxda Dowlad-goboleedka ka qabaan in ay lumin doonaan maamulidda dakhliga lagasoo uruuriyo deegaanadooda ayna golaha deegaanka la wareegi doonaan marka la dhiso.

**Heshiis siyaasadeed oo aan jirin:** Kala qeybsanaanta maamul ayaa caqabad muuqda ku noqotay geedi-socodka dhismaha goleyaasha deegaanka. Xaaladdan ayaa la sheegay in ay dhismaha goleyaasha deegaanka ka dhigtay mudnaan hoose marka la eego ajendayaasha hoggaanka maamulka. Intaa waxaa dheer, awoodda maamulka waxay ku kooban tahay caasimadda sidoo kale sharciyad kama haystaan beelaha qaar haddii ay goleyaal deegaan ka sameyn lahaayeen degmooyinka qaar.

**Amni(darro):** Joogitaanka iyo gacan ku heynta al-Shabaab ee tuulooyinka ku xeeran magaalooyinka waaweyn ee maamulka, kahor inta aysan hawlgallada socdaa billaaban, ayaa caqabad weyn ku noqotay geeddi-socodkii dhismaha goleyaasha deegaanka ee magaalooyinka waaweyn iyo magaalooyinka yar yar. Kooxda ayaa la sheegay in ay saameyn aan toos ahayn ku lahayd magaalooyinka. Sida lagasoo xigtay qaar kamid ah ka qaybgalayaasha daraasadda, oday dhaqameedyo kasoo jeeda beelaha oo muhiim u ahaa hannaanka dhismaha goleyaasha deegaanka ayaa ku noolaa tuulooyinka ay maamulaan al-Shabaab sidaas darteedna aysan ku lug yeelan karin cabsida ay ka qabaan kooxda ama u hoggaansanaanta amarkooda ah in aan laga qayb gelin. Mas'uul sare oo ka tirsan Wasaaradda Arrimaha Gudaha Hirshabeelle ayaa xusay in xitaa odayaasha ku sugan magaalooyinka sida Jowhar ay muujiyeen in ay ka caga jiidayeen ka qeyb galka doodaha ku saabsan dhishama golaha deegaanka sababo la xiriira cabsi ay ka qabaan al-Shabaab.

**Cabsida laga qabo in isbeddel ku yimaado awood-qeybsiga beelaha:** Qaar kamid ah beelaha/jufooyinka ugu tunka weyn magaalooyinka waaweyn ee Hirshabeelle ayaa ka qeybgalayaasha cilmibaaristu ku dhaliileen in ay xagal-daaciyeen dadaallada lagu doonayay in goleyaal deegaan loogu dhiso degmooyinka. Waxaa la rumeysan yahay in ay ka walaacsan yihiin in metelaaddooda sarreeysa hoos loo dhigo oo aysan helin metelaad ku filan oo u dhiganta awooddooda iyo saameyntooda.

**Ka go'naan la'aanta odayaasha dhaqanka:** Odayaasha dhaqanka waxaa lagu eedeeyaa inay ka caga jiidayaan oo aysan la shaqeyn geeddi-socodka dhismaha goleyaasha deegaanka ee Hirshabeelle. Qaar kamid ah ka qeybgalayaasha daraasadda ayaa rumaysnaa in odayaasha beelaha ay u fahamsan yihiin in samaynta gole deegaan si rasmi ah u metela bulshada ay soo afjari doonto ama xaddidayso kaalintooda.

Si ka duwan Hirshabeelle, dowlad-goboleedka Galmudug ayaa la kulmay hal caqabad oo hor istaagtay dhismaha golaha deegaanka ee degmada Hobyo ee gobolka Mudug. Arrintani ayaa la xiriirta loollan beeleed ka dhex jira jufooyinka Sacad iyo Saleebaan oo ka tirsan beesha Habar gidir oo la xiriira saamiga ay beel kasta ku yeelanayso golaha deegaanka iyo jufada qaadan doonta jagada duqa magaalada.

Waxqabadka goleyaasha deegaan ee laga dhisay Galmudug & Hirshabeelle

Goleyaasha deegaanka ee laga dhisay Galmudug iyo Hirshabeelle waxay la halgamayaan arrimo xaddidaya howlahooda shaqo. Arrimaha soo socdaa waa caqabado lagu ogaaday xogtii lasoo arururiyay iyo wada-hadallado aan rasmiga ahayn oo aan la yeelanay bulshooyinka dega magaalooyinkii daraasadda laga sameeyay ee labada maamul.

**Awood marooqsi:** Arrin weyn oo ay ka hadleen ka qeybgalayaasha doodo kooxeedyada iyo dadkii la wareystay ee la xiriiray shaqeyn(la'aan)ta goleyaasha deegaanka ayaa ahayd in duqa magaalada iyo xog-hayeyaasha – oo ay soo magacaawdo Wasaaradaha Arrimaha Gudaha ee dawlad-goboleedka – ay awoodda gacmahooda ku koobeen iyagoo xildhibaannada goleyaasha deegaanka ka hor istaagay go'aan ka gaarista arrimaha muhiimka ah ee mas'uuliyadooda ah. Dadka qaar ayaa arrintan ku macneynayay in sharciyada dowladaha hoose ee Galmudug iyo Hirshabeelle aanay kala xadeyneynin awoodaha duqa magaalada, xoghayeyaasha, iyo xubnaha goleyaasha deegaanka.

**Fahamka hooseeya ee xubnaha goleyaasha deegaanka:** Inkastoo dhalinyaro aqoon leh ay xubno ka yihiin golayaasha degmooyinka, xildhibaanada qaar ayaa la rumeysan yahay in aysan faham sax ah ka haysan howlaha golaha deegaanka laga filayo in uu qabto. Waxaa laga yaabaa in ay arrintan sabab u tahay in qaar kamid ah xildhinaada ay kuraastii golaha raadsadeen iyaga oo u malaynaya in xubinimadu ay kusoo kordhin karto dhaqaale balse markii dambe waxa ay ogaadeen in arrintu aanay sidaa ahayn. Taasi waxay keentay in qaar kamid ah xildhibaanada ay si iskood ah uga tagaan goleyaashaha deegaanka, sida ka dhacday degmada Cadaado, sida uu sheegay xildhibaan ka tirsan golaha deegaanka oo halkaas lagu wareystay.

**Ka cagajiidka bixinta canshuurta ee ganacsatada:** Dowladaha hoose ee goobaha daraasada laga sameeyay ayaa uruuriya canshuur xaddidan. Arrintan ayaa la xiriirta ka cago-jiidka ganacsatada ee canshuur siinta dowladaha hoose. Isaga oo qeexaya sida ay ganacsatada uga baxsadaan bixinta canshuuraha, xildhibaan ka tirsan golaha deegaanka ee degmada Cadaado ayaa yiri: "Waxay [ganacsatada] adeegsadaan odayaal beeleedyo iyo maleeshiyo, mararka qaarna waxay colaad beeleed ka dhex abuuraan beelaha deriska ah si ay uga fogaadaan bixinta canshuuraha".

**Maamul daadejin la'aan:** Xildhibaanada goleyaasha deegaanka ee la wareystay ayaa dowladaha heerka dowlad-goboleed ku dhaliilay inay sii haystaan awoodaha dowladaha hoose, tanina waxay wiiqaysaa shaqada iyo waxqabadka goleyaasha deegaanka. Tani waxay la mid tahay natiijooyinkii cilmibaaris ay dhawaan daabacday SPA oo lagu baaray u daadejinta canshuuraha iyo adeegyada bulshada ee dowladaha hoose ee Soomaaliya.

## Talooyin tixgelin mudan

Marka la eego natiijooyinka kor ku xusan ee kasoo baxay daraasaddan socota, halkan waxa aan kusoo bandhigeynaa qaar kamid ah talooyinka ay soo jeediyeen ka qeybgalayaasha cilmibaarista:

1. Si loo helo goleyaal deegaan ee shaqeeya, waa in dowlad-goboleedyadu ay u qoondeeyaan wakhti ku filan iyo dhaqaale dhismaha golaha deegaan ee degmo kasta sidoo kale waa in bulshooyinka uu khuseeyo loo oggolaado in ay si dhab ah u wada hadlaan, iskuna tanaasulaan. Arrinkan waxaa lagu gaari karaa in la yareeyo faragelinta dowlad-goboleedyada ee geedi-socodka iyo in la xaddido doorka dowlad-goboleedyada ee ku lug lahaanshaha arrimaha farsamo iyo dhaqaale sidoo kalena waa in la hubiyaa in geeddi-socodku waafaqsan yahay hannaanka sharci ee dowladaha hoose.
2. Waa in dowladaha hoose ay muujiyaan kalsooni iyo hufnaan si ay ganacsatada deegaanka ugu dhiirageliyaan bixinta canshuuraha dowladaha hoose. Si taas loo sameeyo, waa in goleyaasha deegaanka ay la xisaabtamaan masuuliyiinta dowladaha hoose. Sidoo kale, waa in ay la wadaagaan bulshada deegaanka oo ay kamid yihiin ganacsatada, halka iyo sida ay ku kharash-gareeyaan canshuurta yar ee ay uruuriyaan.
3. Waa in hoggaamiyeyaasha siyaasadda ee dowlad goboleedka Hirshabeelle ay muujiyaan go'aan dhab ah oo ay geeddi-socodka hore ugusii amba qaadaan. Sida muuqata maamulka waxaa ka maqan ka go'naansho siyaasadeed, tanina waxay saameyn ku leedahay in daneeyayaasha kale ay qeyb ka noqdaan geeddi-socodka. Ka go'naanta siyaasadeed waxa ay imaan kartaa haddii la xalliyo arrimaha la xiriira awood qeybsiga oo hadda curyaaminaya heshiiska siyaasadeed ee Hirshabeelle. Haddii aan dib loo eegin qaabka uu hadda u dhisan yahay maamulka, sidoo kalena aan la xallin arrimaha la xiriira qaab-dhismeedka sida caasimadda, loollanka madaxtinimo ee beelaha, dakhli uruurinta iyo sidoo kale metelaadda baarlamaanka maamulka, waxaa adkaan doonta in la helo ka go'naansho siyaasadeed oo lagu hormarinayo dhismaha goleyaasha degmooyinka.
4. Waa in wacyigelin loo sameeyo dadka degan degmooyinka, taasoo ku saabsan muhiimada ay goleyaasha deegaanka u leeyihiin hab-nololeedkooda. Wacyigelintu waa in ay sii socotaa kadib dhismaha goleyaasha deegaanka, si wax looga beddelo fikradaha khaldan ee saameyn ku yeelan kara waxqabadka goleyaasha deegaanka iyo guud ahaan dowladaha hoose.

**Somali Public Agenda**
Muqdisho Soomaaliya
+252(0)85 8358
info@somalipublicagenda.org
<https://www.somalipublicagenda.org>

@somalipubagenda